



# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, Tr. 1 Jennayo 1974

L. 1

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee kii tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya  
gudeheeda dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay  
wuxuu ka bilabmaa l Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxi ka yar  
waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka  
Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshu'aha ee  
Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1 Tr. 13 Dishembre 1973 — Guddiga Maa-  
muika Wakaaladda Moska.

Bog 3

SHARCI L. 2 Tr. 20 Disember 1973 — Canshurta qiimaha  
Guryaha Daarahaa ah.

» 4

SHARCI L. 3 Tr. 25 Disember 1973 — Toosin qodobka  
220 aad ee Xeerka habka cigaabta.

» 7

SHARCI L. 4 Tr. 27 Disember 1973 — Qalidda sabab-baa-  
rista dhimashada qaadidda iyo ka-faa'ideysiga xubnaha  
uudianaha.

» 7

SHARCI L. 5 Tr. 27 disember 1973 — Tijaabo cilmi ah  
co lagu samayanyo dadka iyo xoolaha.

» 11

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER WASAARADDA ARRIMAHAA GUDAHA, 17 Di-  
shember 1973, L. 1 — Magacaawgii Wakiillada bee-  
sha-idaarada guddiga Kacaanka ee damgmada Gorawe.

» 13

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27  
Disember 1973, L. 2 — Magcaabid Garsoorayaasha  
Cusub.

Bog. 15

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27  
Disember 1973, L. 3 — Magcaabid Garsoorayaasha  
Cusub.

» 17

SHARCIGA L. 5 Tr. 27 Dishembre 1973,

Tijaabo cilmi ah oo lagu samaynayo dadka iyo xoolaha.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Waraaqda Koowaad iyo Waraaqda Labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

OO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

IYADO uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tac-liinta Sare, iyadoo uu la qabo Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka.

WUXUU DEJINAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1

Mar alla markii loo baaho in qof bukaan ah la daweeye ama la qalo, dama laga leeyehayna ay tahay waxyaalaha ka iman kara in la ogado, waa in lala socodsiiyaa bukaanka, haddii uu yee lana waa inuu qoraal ku oggolaadaa dawaynta ama qalidda caynkaas ah.

Qodobka 2

Tijaabo lama bilaabi karo hadduusan oggolaan Guddi ka kooban seddex qof aan horey ula socon danta baadhista loo samaynayo.

Qodobka 3

Guddigaas lagu sheegay Qodobka 2aad, waxaa magacaabaya Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka kaddib markii uu qoraal ku soo weylii-sto takhtarka tijaabada samaynaya, isagoo ku soo lifaaqaya warbixin caddaynaysa danta laga leeyahay iyo barnaamijka tijaabadaha.

Qodobka 4

Guddiga waa in lala socodsiiyaa hadba tijaabadu halka ay marayso iyo waxyaalaha ka imanaya. Haddiise uu garto Guddigu waa uu jocjin karaa tijaabada iyo baadhista isagoo dib ula noqonaya amarkii uu horey u baxshay.

Qodobka 5

Bukaankii oggololaada in oogadiisa wax lagu tijaabiyo waa in laga badbaadiyaa oo caymis looga celiyaa dhibaatoooyinkii uga iman kara. Badbaada dhawrkaas waxaa xilkeedu saaran yahay Walkaaladda tijaabiska lagu samaynayo.

Qodobka 6

Oggolaanta qodobka 2aad waxay ku xidhan tahay:

- (a) haddii tijaabodu ay tahay mid si cilmi ah loo caddeeyey oo faa'iida keeni karta xagga dawaynta;
- (b) haddii tijaabisku uu yahay mid aan waxyeella weyn gaadhsii-naysa qofka ama uusan u dhiman karin ama aan lixdiisa lixaad wax u dhimayn.

Qodobka 7

Haddii dantu tahay wax ku beerid iyo wax baadhis waa la samayn karaa tijaabo ku saabsan qalidda xoolaha haddii la dhawrayo shuruudahan:

- (a) xoola tijaabada waa inayan dhibaatoon oo xanuun aan baadhista u faa'iidaynayn la gaadhsiin;
- (b) tijaabada iyo qalidduba waa inay ahaadaan kuwa ay ku soo oggolaatay Wasaaradda Caafimaadku weydiintii takhaatiirta oo ay ku xidhan tahay warkabixin qoran;
- (t) waa in xoolaha jidhkooda laga badbaadiyaa jabniin, naafo, iwm. Kuwa aan bogsoon karayna waa in xanuun la'aan lagu dilaa.

Qodobka 8

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, iyadoo uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, ayaa xeerinaya ni-daamka lagu hirgelinayo sharcigan.

Qodobka 9

Sharci ama xeer kasta oo aan la socon ama kaba soo hor jeeda xeerkana waa mid dhaqan beelay.

Qodobka 10

Sharcigan wuxuu raacayaa Ururinta Sharciyada Jamhuuriyadda Diumuqradiiga ee Soomaaliya wuxuuna dhaqan gelayaa degdeg, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 27 Dishembre 1973.

*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*  
MADAXWEYNAHA  
GOLAH SARE EE KACAANKA